


ILAAI NAFTAADA, ASXAABTAADA IYO QOYSKAAGA

NABAD KU JOOG



Si joogto ah u dhaq
gacmahaaga



Ka fogoow 2 mitir
dadka aadan la
nooleyn



Xidho marada wajiga lagu
daboolo markaad joogto
meelaha dadweynaha ee
gudaha ah meeshaas oo aadan
si ammaan ah ugu dheeraan
Karin dadka masaafa

ISKA RAADI ASTAAMO



Qufac
cusub, oo
joogto ah



Heerkulka
sare



Lumidda, ama
isbedelka, dareenkaaga
wax urinta ama
dhadhanka

MA QABTAA ASTAAMO? GURIGA JOOG OO HALAGU BAARO

Baaritaan ka dalbo
khadka tooska ah si

nhs.uk/coronavirus

AMA WAC 119

AAD U BADBAADISO NAFTAADA IYO KUWA AAD JECESHAHAY



Waxaan halkaan u joognaa inaan ku caawinno

Haddii aad dhibtooneysid sababo la xiriira cudurka korona-fayras, khadka caawimaadda ee 'We are Islington' ayaa kaa caawin kara. Iyo sidoo kale waxaa lagaa caawin karaa inaad hesho agabyada muhiimka ah sida cuntada iyo daawada, halkaan ayaan kuu joognaa haddii aad dareemayso cidlo, go'doon, ama walaac ama haddii aad u baahan tahay keliya sheeko saaxiibtinimo. Waxaan sidoo kale bixin karnaa talo iyo taageero oo la xiriira dhaqaalaha iyo gunnooyinka.

Wac **020 7527 8222** ama iimayl u dir weareislington@islington.gov.uk, 7 maalmood usbuucii, 9 subaxnimo ilaa 5 galabnimo. Luqadda Dhagoolayaasha ee Biritishka (BSL), waxaad isticmaali kartaa Signvideo. Waxaad macluumaad dheeraad ah ka heli kartaa www.islington.gov.uk/bsllive

Taageero haddii aad ka walwalsan tahay bixinta kiradaada ama guriga lagaa saarayo

Waan ognahay in dad badan oo deganayaal ah ay dhaqaale ahaan u dhibtoonayaan dhibaatooyin dhaqaale jiro awgeed, laakiin talo iyo taageero maxalli ah ayaa la heli karaa. Haddii aad ku dhibtooneysid bixinta kiradaada oo aad ka walwalsan tahay in guriga lagaa saaro, fadlan wac **020 7527 6053** ama iimayl u dir advice.housing@islington.gov.uk

Taageero haddii aad shaqo la'aan tahay

Haddii aad u baahan tahay caawimaad ah tababar foolka-fool ah, hagitaan, ama taageero ku aadan inaad hesho shaqo ama tababar, adeeggeena iWork ayaa kaa caawin kara. Wac **020 7527 2706**, iimayl u dir iwork@islington.gov.uk ama booqo www.islington.gov.uk/employment

Ma caawin kartaa oo ma awood siin kartaa bulshada?

Maaddaama dhibaataada cudurka korona-fayras uu sii socdo, dad aad u tiro badan ayaa u dhibtoonaya dhaqaale ahaan, bulsho ahaan iyo maskax ahaanba. Iska diiwaangeli si aad u noqotid Halyeyga Caafimaadka COVID-19 (COVID-19 Health Champion) - tababar bilaash ah oo ku saabsan sida bulshadaada loogu wargaliyo macluumaadka iyo tilmaamaha ugu dambeeyay ee ku saabsan cudurka korona-fayras, iyo isha ku haynta dadka u baahan caawimaad. Faahfaahin intaa ka badan ka raadi www.islington.gov.uk/covidchampions

Haddii aad haysato waqti firaqo ah oo aad jeclaan lahayd inaad ka qaybgasho, kooxaha bulshada ee xaafaddu waxaa ku yar mutadawiciin xilligan waxayna jecelaan lahaayeen inay warkaaga maqlaan. Faahfaahin intaa ka badan ka ogow www.islington.gov.uk/coronavirus. Ama waxaad deeq ka dhiiban kartaa www.islingtongiving.uk/covid-crisis-and-recovery ama wac **020 7288 6941**. Dhexdeenna, waxaan horey u soo uruurinnay £400,000 oo loo isticmaalayo in lagu caawiyo taakuleynta dadka ugu nugul bulshada.



ISLINGTON